

Middle Ear Infection (Somali)

## Infekshanka dhegta dhexe



Infekshanka dhegta dhexe (sidoo kale waxaa loo yaqaan acute otitis media) waa infekshan ku dhaca qeybta dambe ee dhegta.

Infekshanadaan aad bay ugu badan yihii carruurta yaryar sababtoo ah waxay leeyihiin tuubooyin yaryar (oo loo yaqaanno Eustachian tubes) kuwaas oo dhegta dhexe ku xira dhuunta.

Marka ilmuu hargab ku dhaco, jeermiska dhuunta ka soo baxa wuxuu u gudbi karaa dhegta dhexe wuxuuna keeni karaa infekshan.

### Calaamadaha iyo xanuunka



Dhego xanuun



Jiididda ama xoqidda dhegta gaar ahaan marka ay jiifaan (nuuneyaasha iyo carruurta yaryar)



Xanaaq (dareen xanaaq iyo in wax la dhibsado), oohin badan



Qandho (heerkulka/tambareejarka ka sarreya 38°C)



Diif biyobiyo ah, cune xanuun ama qufac



Dheecaan ama dhiig ka imaanaya dhegta (tani waa calaamadda lagu garto dhegta inay dillaacday).

### Daawaynta

Paracetamol (Panadol ama Dymadon) iyo Ibuprofen (Nurofen) ayaa badanaa ah daawaynta kaliya ee caabuqa dhegta dhexe. Raac tilmaamaha ku yaal dhalada ama xirmada si aad u ogaatid qiyaasta saxda ah. Ha siin ilmahaaga wax ka badan inta lagu taliyay in la siiyo maalintii. Xanunka infekshanka dhegta dhexe wuxuu caadi ahaan ku dhamaadaa hal ilaa laba maalmood kadib xitaa haddii aan la daaweynин.

Haddii ilmahaagu uu weli xanuun dareemayo 48 saacadood ka dib, waxaa laga yaabaa in GP-gaaga ku siiyo xanuun baabi'iye culus ama antibiyootik si loogu daweeyo infekshanka. Antibiyootigyada iyo dawooyinka sankha fura ma caawin doonaan ilmahaaga.

### Daryeelka guriga

Sii ilmahaaga dawo xanuun, haddii loo baahdo. Raac tilmaamaha ku qoran dhalada ama baakadda si aad u ogaatid qiyaasta lagu taliyey ee daawada ee aad ilmahaaga siineyso. Ha siin wax ka badan inta lagu taliyay in la siiyo maalintii.



Haddii ay dhegta dillaacay ilmahaaga, waa inaysan wax biyo ah ka galin dhegta ugu yaraan 10 maalmood ama ilaa ay ka reysanayaan. Dhakhtarkaagu wuxuu u baahan doonaa inuu fiiriyoo dhegta ilmahaaga si loo hubiyo inay reysatay.

Booqo GP-ga ilmahaaga isla marka ay dhameeyaan antibiyootiga si aad u hubiso in infekshankii meesha ka baxay.

Badanaa wax dhibaato ah kama imaaneyso haddii ay caruurta ku safraan diyaarad 2 toddobaad ka dib markuu xanuunku dhammaado.

## Goorta loo baahan yahay in la arko dhakhtar

U tag GP-ga haddii ilmahaagu:

- leeyahay calaamadaha lagu garto infekshanka dhegta dhexe oo uuna ka yar yahay 6 bilood
- leeyahay calaamadaha xanuunka in ka badan 2 maalmood
- leeyahay calaamado sii xumaanaya
- leeyahay barar iyo guduudasho dhegta gadaasheeda bararan tahay ama gaduudan tahay
- leeyahay dheecaan ama qoyaan dhagta ka imaanaya
- uu yahay Aboriginal Ama Torres Strait Islander (maxaa yeelay waxay halis sare ugu jiraan in infekshan uu ku dhaco)
- ay ku safrayaan diyaarad 1 usbuuc ka dib markii uu infekshanka ku dhacay.

GP-gaagu waxa uu eegi doonaa gudaha dhegta ilmahaaga isaga oo isticmaalaya qalab gaar ah oo leh muraayad wax weyneeyisa iyo toosh si ay uga caawiso inuu ogaado infekshanka.

Ilmahaagu waa inuu arko GP-gooda 3 bilood ka dib markii uu infekshanka ku dhacay si loo hubiyo in dhammaan qoyaankii gudaha dhegta uu meesha ka baxay.

Haddii ilmahaagu qabo infekshanno badan oo dhegaha ah, waa in maqalkooda uu baaro khabiir ku takhasusay maqalka (maqal-yaqaan).

GP-gaaga waxa kale oo laga yaabaa inuu sii gudbiyo si uu u arko dhakhtarka carruurta ama dhakhtarka dhegaha, sanka iyo cunaha (ENT).

Waxaa soo saaray Madaxa Gargaarka Degdegga ah iyo Madaxa Otolaryngology iyo Waaxaha Qallinka Qoorta, Isbitaalka Carruurta ee Queensland. Wuxaan qiraynaa talooyinka macaamiisha iyo daryeelayaasha. **Resource ID:** FS166 **Reviewed:** July 2022

**Cudur daa:** Macluumaadkan waxaa soo saaray xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka si loogu isticmaalo inuu noqdo tilmaame kaliya waxaana loogu talagalay inay taageerto, laakiin aysan beddelin, wada-hadalka dhakhtarka ilmahaaga ama xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka. Macluumaadka si joogto ah ayya loo cusboonaysiyyaa, markaa fadlan hubi inaad tixraacayso nuqlkii ugu dambeeyay. Raadso la-talin caafimaad, ee markaas ku habboon, walaacyada ku saabsan caafimaadka ilmahaaga.